

Samawade Sedkiisii Ma Helay (2-2)
Cadaaladda Ilaahay iyo Cajaa ibteeda

Adduunyadu waa wareegeysaa.. Ayaamuhuna waa soconayaan.. Wax walbaana meeshooda ma taagnaanayaan.. Samawade waa hana qaaday, Adduunyada haduu marayna waa Shaqaystay, meelna waa kasoo baxay.. Muddo ka dib ayuu dalkii uu ku barbaaray kusoo noqday.. Maamadii min weyn ahayd, waa tabar yaraysay, bukaan ayey noqotay, xanuun daran ayaa qabtay, wiilasheedu qaar baadiyi jira iyo qaar magaala jooga laakiin aan waxba gacan ku hayn ayey noqdeen, Samawade oo jeebkiisu qoyan yahay ayaa tuuladii kusoo noqday..

Dadku waa is yaqaan Tuulooyinka yar yar, waxaa lays weydiinayaa: bal muxuu fali doonaa Samawade? Islaantii aabihiis qabey ee uu dhibaatooyinka tuuladu ogtahay kasoo maray ma u tegi doonaa? Ma soo booqan doonaa? Dadku warka waa jecelyihiin.

Samawade qalbigiisa xumaani kuma jirto, wuxuuna mar horeba go'aansaday tiisa inuu cafiyo, Ilaahayna u weydiyo cafis wixii kasoo gaarey aayadiis.. Samawade maanta isagaa loo baahanyahay, go'aankiisuna waa cadyahay.. Waa inuu aayadiis wuxuu la qaban karo la qabto.. Islaantii ayuu tuuladii ka qaaday, Cisbitaalada ugu weyn magaalada ayuu geeyey, daawo iyo dhakhaatiir intuu la mari karey ayuu la maray, wiilashii iyo gabdhihii walaalihiis ahaa ee looga hiilin jirey ayuu ururiyey, mid uu meherad u furo, mid uu wax siiyo, mid uu dhoofiyo, ayuu Ka dhigay.. Odagiina meeshiisa ayuu wuxuu u baahnaa ku siiyey.

Mar walba oo Islaanta indheheedu ku dhacaan Samawade iyo siduu yeelayo, jirkeeda galiilyaa ka kacda, indheheedana ilin qoomamo ayaa kusoo istaagta: Ma wiilkii aan isaga iyo hooyadiis cadaadiska saaray ayaan maanta u baxsaday? Ma waxaan kuwaan dhalay ee caloosha ku qaaday i tarin ayuu i taray?

Xaaladdii Islaantu wey adkaatay, cudur xun ayaa lagu sheegay, meela badan oo kharash badan u baahan ayuu Samawade geeyey, Wexey ku tiri: Samawadow wiilka walaalkaa inuu reer yeesho ayaan jeclahay, waa wiilkeedi u yaraa, waayahay Hooyo, ayuu ugu jawaabey, waana u oofiyey ballantaa.. Ilaahay ayaa Qur'aanka innoogu sheegay (Waxaad Dhahdaa uma hanto Naftayda Nacfi iyo Dhib midna, wuxuu Eebe doono mooyee, haddaan ahay mid og waxa maqan waxaan badsan lahaa Khayrka imana taabteen Xumaani).

Minweyn hadey ogtahay cilmiga ka dahsoon, amase si dhaba u aaminsantahay wixii Allaah ku anfaca iney wax tarayaan, minyaro iyo wexey dhashay ma xumayseen, dumarka la mid ihina dhibaata uma mareen arrinkaas, inkastuu yahay dabci dumarka iskaga abuuran haddana, haddii cilmiga iyo caqligu shaqayaan, dhibkaa waa laga badbaadi lahaa.. Waxaan ku xusuustay sheeka la mid ah oo ku dhacday hooya Soomaaliyeed, berigii miyiga la joogey, ayaa odageedu gabar kale guursadey, wiil ayey u dhashay, Islaantuna wiilal kaley lahayd, dagaal ayey odaga ku qaaday, waaya dambe oo raggii wada keceen, ayey Muqdishu timi, wiilkeedii oo deggan, gurigiisa markey timi sidey rabtey maamadu ma helin, gabadha wiilkeedu qabaana uma gogol

wanaajin, iyadoo arrimaha aad u saluugsan, aanse meel aadi karin, ayaa waxaa imaatinkeeda maqlay wiilkii kale ee bahda yar ahaa, maamadii ayuu soo salaamay ka dibna wuxuu ka codsaday walaalkiis in hooyo ayaama la soo joogto oo uu gurigiisa geeyo oo ay caruurtiisa soo aragto, sidii ayey noqotay, gaari ayuu ku ritey, gurigiisii ayuu geeyey, maashallaah, meel fiican ayaa maamadii la dejiyey, xaaskiisuna gabar fiican ayey ahayd oo maamadii (aayada ama eedada) minkeeda si wanaagsan ayey u soo dhoweysey, adeeg, kool koolin, sheeko, hadiyado, kax kaxayn, wiilku mar walbuu soo galo iyadaa lala fariistaa, isaga iyo xaaska iyo caruurta, soorya fiicanna gacantuu u geliyey, maamadii waa yaabtay, kii ay dhashayna sidaa iyo wax u dhow kama helin, maamadaasu markey kusoo noqotay dhulkeedi ee la waraystay, wexey ka tagay dardaaran, wexey tiri: (war dumarow weligiin ha cadaawaysanina midda laydin la guursadey iyo caruurteeda, wax xaal ku dambayn doono ma ogidiine.. Haddaan qeybka ogahay odaga maalintii aan la dagaalayey, ducaan ugu dari lahaa).

Maaha sheekadaan waxaan u sheegayaa inaan raga jar ka tuuro, ama gurya deggan aan kiciyo, ama gabdhaha ka caraysiiyo, laakiin wax yaabaha cibrada mudan, iyo xikmadda sharciga qayb ka mid ah ayaan jeclaystay.

Samawade hawshii aayadiis si fiican ayuu u maamulay, ha yeeshee aakhirii Saacadeedi ayaa timi.. Aaye wey xijaabatay, dembi dhaaf ayuu ilaahay u weydiiyey, waana cafiyey, Laakiin Qisadu wexey noqotay cibra kale oo dadka adduunyadani sidey u socoto tusineysa, in iimaanku sed weyn yahay, dulmiga caaqibadiisu inaaney wanaagsanayn, gaar ahaan dadka daciifkaa sida ilmaha iyo fuqarada iyo wixii la mid ah, wexey inna tustay mar kale, qanaacadu sed weyn iney tahay, waxa ilaahay kuu qorayna inaan cid kale cunayn inaad ku qanacdo oo aadan qofna ku colaadin wax aad lahayd ayuu kugu ciriirinayaa.. Qof walba ilaahay ayaa risiqiisa iyo qaybtiisa qoray, qalbiga waasicaa iyo cafisku waa sed weyn oo ilaahay bixiyo.. Ilaahay qayb fiican ha nooga qaybsho..